Qorax Madoobaadka 2017-ka: Diyaar ma u tahay?

Inkasta oo dugsigu xiran yahay, weli waa fikrad fiican adiga iyo qoyskaaga in aad qorshe yeelataan Isniinta, Ogoosto 21 marka Portland iyo meelaha ku hareereysan la filayo in ay arkaan dad aad ah oo ku soo qulqulaya goobta si ay u arkaan qorax madoobaadka buuxa ee sida aadka ah loo filayo. Iyada oo la tixgelinayo culeyska isku socodka gaadiidka ku imaan kara ee la saadaaliyay iyo khalkhal ku dhici kara adeega telefoonka gacanta, waa in aad web site-ka PPS ka eegtaa wixii ogeysiin ah ee ku saabsan isbedelada ku aadan hawlaha degmada ee maalintaasi.

Qaar ka mid ah is xasuusinta ku saabsan isku diyaarinta dhacdadan:

- Filo dad badan, jidadka iyo isku socodka gaadiidka oo badan. Gacanta ku hayso biyo iyo sahayda gargaarka degdega ah;
- Samir yeelo. Soo qaado buugaag, wax lagu cayaaro, iwm.; si aad isku mashquuliso;
- Waxaad lahaataa qorshe xirmada gargaarka degdega ah; Xaqiiji in xubnaha ka tirsan qoyska ama asxaabta ee aad guryaha kaga timid ay ogyihiin jadwalkaaga, marka lagaa filayo in aad soo noqoto iyo qorshahaaga haddii wax dhacaan.
- Waxaad xaqiijisaa in aadan ka maqnaan dhacdada aadka u dhifka ah, laakiin si toos ah ha u eegin qoraxda adiga oo aan haysan wax ku habboon oo indhaha la gashado.

Kristin Moon, oo ah Macallin Shaqada Gaarka ah u Qaabilsan PPS ee sayniska dugsiga dhexe iyo dugsiga sare wuxuu dhammaan ardayda ku dhiirigelinayaa in ay fiiro gaar ah wax u yeeshaan.

“Qorax madoobaadku wuxuu ardayda iyo qoysaska siinayaa fursad ay ku arkaan dhacdada dhanka sayniska ah ee dad badani kaliya ka bartaan buugaaguta iyo filimada. Inkasta oo Portland ayna ku oolin jidka ay si buuxda u qaadayso qoraxdu, waxaanu weli arki doonaa qiyaastii boqolkiiba 99 oo ah qorax madoobaadka. Waxaan ardayda iyo qoysaska ku dhiirigelinayaa in ay dhacdadan wax ka bartaan intii suurtagal ah, si badbaado lehna u arkaan qorax madoobaadka, kuna lug yeeshaan sayniska, iyo dabaaldega xiisaha leh.”

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan hababka aad u arki lahayd qorax madoobaadka isla markaana u maareyn lahayd socdaalkaaga iyo sahaydaada, fadlan fiiri qoraalka ka hadlaya SU’AALAHA INTA BADAN LA ISKA WEYDIIYO ee ay soo saartay Maareynta Xaaladda Degdega ah ee Oregon: http://www.oregon.gov/oem/Documents/2017_Eclipse_FAQ.pdf